

## **Dhammaan waddamada EU/EØS waxay aqbalayaan shahaadada koroona marka loo safrayo**

**Marka xeerka shahaadada koroona ee Midowga Yurub (EU) uu dhaqangalo maanta, 1-da Luulyo, waxa dhammaan waddamada EU/EØS ku waajib ah in ay oggolaadaan in shahaadada koroonahu noqoto wax qofka socdaalka ah u isticmaali karo caddaynta in cudurku ku dhacay, in la tallaalay ama in cudurka laga waayey. Waxa shardi ah in shahaadada koroonahu ku xidhan tahay nidaamka EU.**

Laga bilaabo 5-ta Luulyo waxa Wasaaradda Arrimaha Dibeddu joojinaysaa talooyinkii safarka ee ku saabsanaa in dadku iska dhaafaan dhammaan safarrada laga maarmi karo ee lagu aadayo waddamada EØS/Schengen iyo Ingiriiska.

Dadka si *buuxda u tallaallan* (cinwaanka faahfaahinta) ama cudurka koroonahu ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay, oo arrintaas caddayn kara iyagoo isticmaalaya shahaado koroona oo la xaqiijin karo oo islamarkaana ku xidhan nidaamka EU, waxa ay toos u soo geli karaan Norway iyadoo aan la eegayn waddanka ay ka yimaadeen.

Dadkaas waxa laga dhaafayaa karantiilka, tijaabada la iska qaado inta aan la soo dhoofin, tijaabada lagu qaado xuduudda iyo is-diiwaangelinta marka la soo gelayo waddanka.

Dadka qaatay keliya hal cirbad oo tallaalka ah waa in ay galaan karantiil haddii ay ka yimaadeen waddamada laga dhigay casaan ama casaan tiq ah.

- Waa muhiim in dadka dhoofaya ay sii ogaadaan xeerarka ka jira waddanka ay u socdaan. Xeerarka ka jira waddamada kala duwan ee EU/EØS waxay ku jiraan [reopen.europa.eu](https://reopen.europa.eu).
- [Shahaadada koroona waxaad ka helaysaa helsenorge.no](https://helsenorge.no).

## **Waxa si buuxda u tallaallan:**

- Dadka qaatay laba cirbadood oo tallaalka ah, islamarkaana ugu yaraan hal toddobaad ka soo wareegtay cirbaddii u dambaysay.
- Dadka qaatay tallaal hal cirbad keliya ka kooban (Janssen), islamarkaana 3 toddobaad ka soo wareegtay markii la tallaallay.
- Dadka covid-19 ku dhacay islamarkaana qaatay hal cirbad oo tallaallada koroonaha ah islamarkaana ugu yaraan hal toddobaad ka soo wareegtay markii la tallaallay. Waxaad tallaalka qaadan kartaa ugu horreyn marka saddex toddobaad ka soo wareegto markii lagaa qaaday tijaabada cudurka laga helay.
- Dadka qaatay ugu yaraan hal cirbad oo tallaalka ah islamarkaana ugu yaraan saddex toddobaad kaddib laga helay fayruska koroonaha. Qof si buuxda u tallaallan ayaad noqonaysaa marka aad dhammaysato wakhtiga gooni-u-bixidda (isolasjon).